

DIIWAAN GELINTA  
KA HOR INTA AADAN GAARIN

18

## JAWAABAHHA SU'AALAHAAAN DIIWAAN GELINTA COD BIXINTA

### GUDAHA

#### **HORUDHACA**

Ma isku qori karaa ka hor inta aan gaarin 18 sanno?

Maxay waajib u tahay in aan isku qoro?

#### **DALABKA IN SI KU MEEL GAAR AH LEY DIWAAN GELIYO**

Xaq ma u leeyahay in si ku meel gaar ah ley diwaan geliyo?

Ma leyga qaaday xaqa aan u leeyahay in si ku meel gaar ah ley diwaan geliyo?

Sidee ayaan u dalban karaa in si ku meel gaar ah ley diwaan geliyo?

Macluumaadkee leyga baahan yahay in aan bixiyo?

Xaggee ayaan ka heli karaa foomka diwaan gelinta?

Ma iska diwaan gelin karaa internetka?

Ma casriyeyn karaa tafasiisheyda marka aan adeegsado internetka?

Waxaan ahay New Zealand Māori. Ma dooran karaa liiska leygu qoro?

Waxaan ahay qof itaal darran. Ma heli karaa kaalmo xagga diwaan gelinta ku meel gaarka ah?

Maxaa ku dhaca foomkeyga diwaan gelinta kaddib marka aan dib u soo diro?

Maxaa dhaca marka aan gaaro 18 sanno?

Maxaan sameyaa marka aan baddalo cinwaankeyga?

Maxaan sameyaa haddii aan baddalo magaceyga ama shaqadeyda?

Maxaa dhaca haddii aan halmaamo in aan casriyeeyo tafasiisheyda?

#### **MACLUUMAAD DHEERAAD AH**

Sidee ayaan u helaa macluumaad badan?

Sidee ayaan u helaa macluumaad badan oo ku qoran luqado kale?

WAA IN AAD KU JIRTID DIIWAAN SI AAD CODKAADA UGA DHIIBATID

DOORASHOYINKA BARLAMAANKA NEW ZEALAND

SI AAD U HESHID MACLUUMAAD BADAN

BOOQO BOGGA INTERNETKA ELECTIONS.ORG.NZ AMA WAC TELEFOONKA

0800 ENROL NOW (0800 36 76 56)

Ugu yaraan hal mar saddaxdii sanno, New Zealand waxay qabataa Doorashooyinka Guud (General Election) si loo doorto Barlamaan cusub iyo Dawlad. Waxaa jira cod bixiyeyaal Guud iyo Māori. Koox kasta oo cod bixisa waxay haysataa diiwaanka, ama liiska, qof kasta oo ku qoran diiwaanka in uu cod bixiyo. Haddii aad gaartay 17 sanno, ama aad ka weyn tahay, aadna xaq u leedahay in aad isku qortid, sharciga wuxuu leeyahay waa in lagu geliyo diiwaanka. Haddii aad gaartay 17 sanno, waxaad si ku meel gaar ah isugu qori kartaa diiwaanka. Kaddib marka aad isku qortid, waa in aad casriyeysid tafasiishaada. Diiwaan geliyeyasha cod bixinta, ee u shaqeeyo New Zealand Post Ltd, ayaa la socda diiwaanka.

## HORUDHAC

### **MA ISKU QORI KARAA KA HOR INTA AAN GAARIN 18 SANNO?**

Haa, waxaad isugu “qori kartaa si ku meel gaar ah” isla marka aad gaartid 17 sanno marka aad buuxisid foomka lagu magacaabo “Diiwaan gelinta cod bixinta: Arjiga” (“Enrolling to vote: Application”).

### **MAXAY TAHAY SABABTA LEY DIIWAAN GELIYO?**

Marka aad gaartid 18 sanno, waa in aad isku qortid haddii aad xaq u leedahay in aad sidaas sameysid. Diiwaan gelinta waxay ku siisaa fursad aad codkaada ku bixisid. Cod bixinta waa fursadda aad codkaada uga dhiibatid waxyaabaha ku saabsan dadka iyo axsaabta siyaasaddaha ee loo doorto Barlamaanka New Zealand mar kasta oo la gaaro doorasho guud. Waxaad kaloo fursad u leedahay in aad codkaada ka dhiibatid doorashooyinka guddiga deegaanka iyo guddiga caafimaadka dagmada, iyo referendumyada iyo cod bixinta.

### **CODSIGA DIIWAAN GELINTA KU MEEL GAARKA?**

### **XAQ M U LEEYAHAY IN AAN SI KU MEEL GAAR AH ISU DIIWAAN GELIYO?**

Waxaad isudiiwaan gelin kartaa si ku meel gaar ah haddii:

- Aad tahay muwaadin New Zealand ama aad si joogto ah u daggan tahay New Zealand, aadna,
- Gaartay 17 sanno, iyo,

- Aad mar un si joogto ah ugu nooleyd New Zealand in ka badan hal sanno, iyo,
- Aan lagaa qaadin xaqa aad u leedahay.

## **MA LEYGA QAADAY XAQA AAN U LEEYAHAY IN SI KU MEEL GAARKA AH LEY DIIWAAN GELIYO?**

Laguma gelin karo diwaanka ku meel gaarka ah haddii:

- Aad tahay muwaadin New Zealand oo ku sugan dibadda New Zealand soona gelin New Zealand 3dii sanno ee ugu dambeysay.
- Aad si joogto ah u daggan tahay New Zealand balse aad ku sugan tahay dibadda New Zealand soona gelin New Zealand 12dii bilood ee ugu dambeysay.

(Xasuusin: Waxaa jira waxyaabo ka reeban labada sharci kor ku yaala. Tusaale ahaan, shaqaalaha dadweynaha ama xubnaha ka tirsan Ciidanka Difaaca ee ka hawl gala dibadda New Zealand, iyo sido kale xubnaha ka tirsan qoyskooda.)

Waxaa jira asbaab kale oo qofka loogu diido, kuwaasoo saameeya dad aad u yar. Dadka hoos yimaada asbaabtaas, waxaa la ogeysiiyaa Diiwaan Geliyeyaasha Cod Bixiyeyaasha. Haddii aad qabtid su'aalo, ama fikrado ku saabsan asbaab kale oo qofka looga saaro, wac telefoonka 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) ama fiiri bogga internetka – elections.org.nz.

## **SIDEE AYAAN U DALBADAA DIIWAAN GELINTA KU MEEL GAARKA AH?**

Waxaad buuxisaa foomka diiwaan gelinta lagu magacaabo “Diiwaan gelinta cod bixinta: Arjiga” (“Enrolling to vote: Application”).

## **MACLUUMAADKEE LEYGA BAAHAN YAHAY IN AAN BIXIYO?**

Fadlan ka jawaab dhamaan su'aalaha ku saabsan foomka diiwaan gelinta si aan si sax ah kuu diiwaan gelino.

## **XAGGEE AYAAN KA HELAA FOOMKA DIIWAAN GELINTA?**

- Buuxi kuna soo dir boostada kuboonka ku yaal dusha buugyarahaan kaddibna waxaan kuu soo diri doonaa mid.
- Waxaa laga helaa PostShop kasta lacag la'aan.
- Lacag la'aan naga soo wac telefoonka 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56), kaddibna waxaan kuu soo diri doonaa mid.
- Fariin qoran oo lacag la'aan ah ku soo dir magacaada iyo cinwaankaada 3676, kaddibna waxaan kuu soo diri doonaa mid.
- Codso ama hal ka daabaco boggena internetka – elections.org.nz

Kaddib marka aad soo buuxisid foomka, ku rid PostShop kasta ama u soo dir (looma baahna tigidh):

FreePost 2ENROL

Electoral Enrolment Centre

PO Box 190

Wellington 6140

## **MA ISKA DIIWAAN GELIN KARAA INTERNETKA?**

Haa, si fudud u tag boggena internetka elections.org.nz kaddibna riix battanka „Enrol, check or update” (“Diiwaan gelinta, saxidda ama casriyeynta”). Raac talaabadaha lagu buuxiyo tafasiisha diiwaan gelintaada. Kaddibna waxaad internetka ka soo baxsan kartaa si aad u daabacatid foomka diiwaan gelinta kaasoo horay loogu buuxiyay tafasiishaada, saxiix soona dir si loo dhamaystiro hawsha.

Si kale, waxaad soo gudbin kartaa codsiga kaddibna waxaan kuu soo diri doonaa foomka diiwaan gelinta adiga kuu gaarka ah ee horay loo daabacay si aad u fiirisid, saxiixdid, soona celisid. Waxaad tafasiishaada diiwaan gelinta ka fiirin kartaa boggena internetka.

## **MA CASRIYEYN KARAA TAFASIISHEYDA MARKA AAN ADEEGSADO INTERNETKA?**

Qofka wuxuu awood u leeyahay in uu elataroonig ahaan u casriyeeyo tafasiishiisa diiwaan gelinta kaddib marka uu buuxiyo, iyo marka Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha uu ogolaado foomka “Diiwaan Gelinta cod bixinta: Arjiga” (“Enrolling to vote: Application”) kaasoo muujiya in ay rabaan in ay ka qeybqaataan adeegaan. Waxaa kaloo loo baahan yahay cinwaanka emailka arjiilaha.

Casriyeynta elatarooniga ee tafasiisha diiwaan gelinta waxaa laga gala bogga igovt kaasoo u fasaxa adeegsiga isla tafasiisha lagu galo si loo helo adeegyada dawladda ee kala duwan – igovt waa amaan waxayna asturtaa asturnaantaada.

Kaddib marka laga shaqeeyo diiwaan gelintaada, waxaa lagaala soo xariiri doonaa cinwaanka emailka ku qoran foomkaada diiwaan gelinta si diiwaan gelinta looga dhamaystiro adeegga internetka. Tan waxay kaaga baahan doontaa in aad samaysatid xarfaha lagu galo, ama in aad adeegsatid xarfaha lagu galo haddii aad horay mid u lahayd.

Haddii aad go’aansatid in aadan rabin in aad awood u yeelatid in aad elataroonig ahaan u casriyeysatid tafasiishaada diiwaan gelinta, waa in aad soo ogeysiisid Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha in aad iska dhaaftay fursadda codsiga elatarooniga. Xogta diiwaankaada waxaa loo baddali doonaa sida aad u dalbatay.

## **ANIGA WAXAAN AHAY MĀORI NEW ZEALAND. MA DOORAN KARAA LIISKA AAN RABO?**

Waad dooran kartaa nooca liiska aad rabtid haddii aad tahay Māori New Zealand, marka aad saxiixdid qeybta ku habboon foomka diiwaan gelinta. Kaddib marka aad sameysid xulashadaada, waad baddali kartaa ilaa laga gaaro Cod Bixinta Māori ee xigta.

Macluumaad badan waxaa laga heli karaa buugyarahena lagu magacaabo “Diiwaan gelinta cod bixinta Māori New Zealand” (“Enrolling to vote as a New Zealand Māori”).

## **ANIGA WAXAAN AHAY QOF ITAAL DARRAN. MA HELI KARAA KAALMO XAGGA DIIWAAN GELINTA KU MEEL GAARKA AH?**

Haddii aad jir ahaan u itaal darran tahay, waxaad heli kartaa qof kuu buuxiya, saxiixa foomka, kuna qora taariikhda. Hase ahatee:

- Waa in uu ahaado qof ku jiro diiwaanka cod bixiyaha – macnaha, qof horay ugu jira diiwaanka.
- Waa in foomka diiwaan gelinta, meesha ku xigta saxiixooda, lagu kor daabaco “Cod Bixiye Itaal Darran – lagu saxiixay amarkooda” (“Elector Physically Disabled – signed by their direction”).
- Ama waxaa dhici karto in arjigaada uu dhamaystiro qofka haysta Awoodda Qareenka

(Power of Attorney). Marka lala kulmo xaajadaan oo kale, waa in foomka diiwaan gelinta, meesha ku xigta saxiixooda, lagu kor daabaco “Cod Bixiye Itaal Darran – Awoodda Qareenka” (“Elector Physically Disabled – Power of Attorney”)

Haddii xubin ka tirsan qoyskaada uu madaxa ka itaal darran yahay, waad ku qori kartaa. Naga soo wac telefoonka lacag la'aanta 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) si aad u heshid tafasiil.

### **MAXAA KU DHACA FOOMKEYGA DIIWAAN GELINTA KADDIB MARKA AAN DIB U SOO DIRO?**

Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha ayaa fiirin doono si loo hubsado in si sax ah loo buuxiyay. Haddii ay sidaas tahay, magacaada waxaa lagu wareejin doonaa qeybta liiska cod bixiyeyaasha ku meel gaarka ah ee aad markii ugu dambaysay ku nooleyd. Waxaan boostada kuugu soo diri doonaa ogeysiis si loo xaqiijiyo diiwaan gelintaada ku meel gaarka ah.

### **MAXAA DHACA MARKA AAN GAARO 18 SAANO?**

Maalinta dhalashadaada marka aad gaartid toban iyo sideed sanno, waxaa lagu diiwaan gelin doonaa sida cod bixiye, loomana baahna in aad soo buuxisid foom dheeraad ah. Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha ayaa kuu soo qori doono si uu kuugu sheego in arjigaada laga shaqeeyay iyo in laguugu qoray.

## **MAXAAN SAMEYAA HADDII AAN BADDALO CINWAANKEYGA?**

Ka hor inta aadan guurin, buuxi foomka Boostada New Zealand “Codsiga Wareejinta Warqadaha” (New Zealand Post “Mail Re-direction Request”) ee laga helo PostShop kasta. Warqadahaada waxaa loo diri doonaa cinwaankaada cusub, waxaana la ogeysiin doonaa Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha in aad guurtay.

Haddii cinwaankaada cusub uu weli ku jiro isla goobta aad ka qoran tahay, Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha ayaa casriyeyn doono diiwaankaada ku meel gaarka ah, wuxuuna kuu soo dirri doonaa ogeysiis cusub oo xaqiijin ah.

Hase ahaatee, haddii aad u guurtay goob cusub oo laga cod bixiyo, waxaa lagu soo dirri doonaa foomka diiwaan gelinta hal bil kaddib marka aad guurtid. Dhamaystir, saxiix foomkaan, soona celi, kaddibna Diiwaan Geliyaha goobta cusub ayaa si ku meel gaar ah kuugu qori doono, wuxuuna kuu soo dirri doonaa ogeysiiska xaqiijinta.

Haddii Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha uu magacaada ka heli waayo liiska diiwaan gelinta ku meel gaarka ah, waxay cinwaankaada cusub kuugu soo dirri doonaan foomka diiwaan gelinta.

Si kale, waxaad buuxin kartid foom cusub oo ah foomka diiwaan gelinta ama waxaad tagi kartaa boggena internetka - [elections.org.nz](http://elections.org.nz) – waxaadna internetka ka casriyeyn kartaa cinwaankaada.

## **MAXAAN SAMEYAA HADDII AAN BADDALO MAGACEYGA AMA SHAQADEYDA?**

Haddii aad baddashid magacaada ama shaqadaada, waa in aad qoraal ahaan ogeysiisid Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha baddalka dhacay sida ugu dhaqsiiyaha badan ee suurtoogalka ah. Waxaa kaloo jira, in aad buuxin kartid foom cusub oo ku saabsan diiwaan gelinta ama waxaad tafasiishaada ka casriyeyn kartaa boggena internetka - [elections.org.nz](http://elections.org.nz).

## **MAXAA DHACA HADDII AAN HALMAAMO IN AAN CASRIYEYO TAFASIISHEYDA?**

Haddii aad halmaamtid in aad casriyeysid tafasiishaada, waxaa dhici karto in aan awood u yeelanin in aan kuula soo xariirno inta lagu jiro ololaha casriyeynta diiwaan gelinta, waxaana dhici karta in magacaada laga saaro liiska.

Waxaad kaddib u baahan doontaa in aad dib isu diiwaan gelisid.

WAAD KU MAHADSAN TAHAY IN AAD AKHRISAY BUUGYARAHAN.

WAXAAN RAJEYNEYNAA IN UU KA JAWAABTAY DHAMAAN SU'AALAHAN KU SAABSAN DIIWAAN GELINTA KU MEEL GAARKA AH

## **SIDEE AYAAN KU HELI KARAA MACLUUMAAD BADAN?**

Waxaa la heli karaa macluumaad badan oo ku saabsan diiwaan gelinta cod bixinta marka:

- la booqdo boggena internetka – [elections.org.nz](http://elections.org.nz)
- la waco telefoonka lacag la'aanta ah 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56)
- la akhristo buugaagta yaryar:

- Wax kasta oo aad u baahan tahay in aad ka ogaatid diiwaan gelinta cod bixinta (“Everything you need to know about enrolling to vote”)\*
- Diiwaan gelinta cod bixinta marka aad tahay Māori New Zealand (“Enrolling to vote as a New Zealand Māori”)\*, buugyarahaan wuxuu ku qoran yahay Ingiriisi iyo Maori
- Wax kasta oo aad u baahan tahay in aad ka ogaatid liiska aan la daabicin ee cod bixiyeyaasha (“Everything you need to know about the unpublished electoral roll”)\*

\* waxaa laga heli karaa PostShops ama xafiisyada Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha.

## **MACLUUMAADKAAN MA KU HELI KARAA LUQADO KALE?**

Buugyarahaan waxaad ka heli kartaa boggena internetka isaga oo ku qoran luqado kale.

Electoral Enrolment Centre

New Zealand Post Limited

P O Box 190

Wellington 6140

Telefoon: 0800 ENROL NOW  
(0800 36 76 56)

Faks: (04) 801 0709

Email: [enrol@elections.org.nz](mailto:enrol@elections.org.nz)

Bogga internetka: [elections.org.nz](http://elections.org.nz)